

Ku socota adigaaga leh carruur dhigata fasalka dugsiga xannaannada iyo iskool

2020-09-22

Waxay tani khuseysaa marka ay carruurta xanuunsantahay

Waan idin salaamay!

Hey'adda caafimaadka bulshadu wey cusbooneysiisay tilmaamooyinkeeda ku aaddan sida wax la yeelayo marka ay carruuri xanuunsantahay.

Goormee ay carruurta imaan kartaa dugsiga xannaannada, goormeysa habboontahay in ay guriga joogaan marka ay calaamado cudur oo noqon kara covid-19?

Waa muhiim in carruurta guriga ka joogto dugsiga xannaannada haddii ay xanuunsanyihiin. Waxay taasi khuseysaa cudur kasta oo uu yahayba.

Marka uu xanuunsado canug dhigta dugsiga xannaano ama carruur aadda xannaaneeye maalintii ah waa in uu canuggu guriga joogyaa ugu yaraan siddeed iyo afarta saacadood, ka dib marka uu caafimaadyo. Mararka qaar waxay carruurta ku jirta da'da dugsiga xannaannadu, 1-6 sano, qabi karaan dhibaato fudud oo dhakhsi u dhamaaneysa oo aan cudur calaamad u ahayn. Markaas looma baahna in guriga laga joogo dugsiga xannaannada iyo xannaaneeyaha carruurta ee maalintii ah. Waxay tusaale ahaan lahaan karaan qufac dhif-dhif ah ama in sanko diif ka yimaado, ka dib marki dibadda loo baxay. Micnaha dhibaato dhakhsi u dhamaaneysa.

Carruur infekshin awgiis guriga uga joogtay dugsiga xannaannada muddo 7 maalmood ah oo dabadeed caafimaadday oo firfircoon wey u laaban karaan dugsiga xannaannada xitaa haddii ay ku hareen calaamado cudur oo yar-yar sida diif fudud ama qufac. Diif iyo qufac haraadi ah ka dib mar uu qofka hargab ku dhacyay maaha wax aan caadi ahayn, carruurta qaarna waxay waxaas sii hayn karaan muddo dhawr usbuuc ah. Taasina markaas maaha wax xannibaya in la aado dugsiga xannaannada.

Dhammaan waxyaabahaas waxay khuseeyaan haddii aan la sameynin wax baaritaan ah oo covid-19 ah. Carruurta ku jirta da'da dugsiga xannaannada, 1-6 sano, uma baahna in laga baaro covid-19 marka ay xanuunsanyihiin, haddii aysan dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad u arkin in taas loo baahanyahay. Östergötland gudeheeda lama baarayo carruurta ka yar-yar 13 sano haddii aysan laamaha caafimaadku (1177) si kale wax u qiimeyn.

Bogga intarneetka ee degmada, norrkoping.se waxaa ku jira macluumaad loogu tala galay adigaaga leh carruur dhigata dugsiga xannaannada ama iskool. Fadlan booqo boggan: www.norrkoping.se/information-om-det-nya-coronaviruset/har-du-barn-i-norrkopings-forskola-skola.html

Salaan saaxibtinimo
Xafiiska waxbarashada